# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

AVV. DR. ABDIKADIR MOHAMED MUSE

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed waxaa lagu ansaxiyey xeer barlamaan oo tirsigiisu uu yahay Lr.1 soona baxay 1/june/1963-kii waxaana lagu faafiyey faafinta rasmiga ah ee cadadkii 9aad ilaa iyo12aad soona baxay 31 Dicembar 1964-kii oo kusoo baxay afka taliyaaniga iyo faafinta rasmiga ah ee cadadka 2aad ilaa iyo 11aad soona baxay 6/Nov/1965-kii kaasoo isaguna kusoo baxay afka ingiriisiga ah ayadoo ah xeer Lr. 1 ee 17/Feb/1968-kii, wuxuuna xeerkani habka ciqaabta ah soo maray marxalado kala duban iyo waqtiyo kala duban oo marba lagu sameenaayey isbadel ah dhinaca qodobada uu ka kooban yahy ayada oo loo maraayo hab-raacii loo marayey soo saarista shuruucda ayadoo ay soo bandhigeyso dawladda dhexe kadib markii oo uu soo gudbiyo hindise sharciyeed wasiirka garsoorka oo waagaasi qaadan jiray magaca xog-hayaha garsoorka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed wuxuu qeyb ka yahay qaanuunka guud ee loo kala qeybiyo qawaaniinta aduunka ka jira sababta uu uga mid noqdayna ay tahay in markastaba uu nidaaminaayo habraacii dacwad qaadista kaasoo aysan maslaxad ugu jirin cid gaar ah.
- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed wuxuu kusoo baxay dikareeto uu soo saaray baarlamaankii soomaaliya 1/june/1963-kii sharci Lr.1 oo uu baarlamaanka ku asaxiyey cod aqlabiyad ah markii la’ hor dhigay hindise sharciyeedkani wuxuuna sidaasi ku noqday xeer sharci ah waxaana lagu qoray buuga faafinta rasmiga ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Soo saarista xeerkani waxaa loo cuskaday Qod.62aad ee dastuur soo baxay 1/July/1960-kii laguna soo qoray buuga faafinta ramiga ah qodobkaasoo baarlamaanka awood usiinaya in xukuumaddu uu u wakiisho in ay soo saarto shuruuc loo baahan yahay asagoo siinaaya muddo sharciga uu tilmaamay inay baarlamaanka ku hor keento.
- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed ee maanta lagu shaqeynaayo wuxuu kasoo jeedaa qoraallada sare ku xusan oo aan soo gaabiyey, laakiin laga heli karo ayadoo faah-faahsan buugaagta kale ee quseeya.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed waa xeer laga sameeyey buug dhan oo ka kooban qodobo is daba yaalo oo nidaaminaayo habraacii dacwad qaadista ee maxkamadda wuxuuna lagama-maarmaan u yahay in la’ galo dacwad ciqaab ah ayadoo uusan jirin xeerkaan.
- Xeerka habka ciqaabta soomaaliyeed waxaa intiisa badan uu waafaqsan yahay dikareeto sharci Lr.3 ee 12/June/1962-kii oo ah Xeerka nidaamka garsoorka xeerkaasoo isaguna waafaqsan soo saaristiisa Qod. 62aad ee Dastuurkii 1960-kii waxaana ku cad in sharciga Lr.5 ee 30/Janaayo/1962-kii baarlamaanka u wakiishay xukuumadda in ay soo saarto xeerka nidaamka garsoorka waxaana la’ dhageystay ra’yiga guddi loo xil saaray arintaasi oo ay dawladdu u wakiilatay in ay soo habeeyaan aqoonyahanno qibrad u leh sharciga.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xeerka nidaamka garsoorka ayaa waxa uu ka kooban yahay labo cutub oo kala ah:-
- Cutubka 1aad oo ah xubnaha garsooridda Qeybtiisa koobaad ayaa waxaa ku cad xubnaha garsoorka waxaana Qod. 1aad ku cad garsooriddu inay tahay maamulka garsoorka iyo cidda maamusha.
- Garsooridda waxaa maamula:

A. Maxkamadaha Degmooyinka
B. Maxkamadda Gobolka
C. Maxkamadda Rafcaanka
D. Maxkamadda sare

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Maxkamadda degmada** waxa ay xarun ku leedahay gobol kasta degmadiisa dhammaan dhulka ay degmadaasi ku fadhido.
- Maxkamadda degmada waxa ay leedahay labo qeybood oo kal ah:

A. Qeybta madaniga ah.
B. Qeybta Ciqaabta.

Waxana labadaasi qeybooddacwadooda galaaya hal garsoore oo kaliya.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qeybta ciqaabta waxa ay geli kartaa dembiyada ku xusan xeerka ciqaabta ee aan ka badnayn ciqaabtooda saddex sanno ama ganaax dhan Sh. So.3000.
- **Maxkamadda gobolka** waxa ay xarun ku leedahay magaalo madaxda gobolka awoodeeduna waxa ay ku baahsan tahay dhammaan gobolka.

Waxayna leedahay labo qeybood oo kal ah :

a. Qeybta madaniga ah
b. Qeybta ciqaabta

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Maxkamadda gobolka waxa ay leedahay labo qeybood oo kala ah:

A. Qeybta ciqaabta ee caadiga ah
B. Qeybta ciqaabta gaarka ah (Assize)

- Dacwadaha ku saabsan qeybta ciqaabta caadiga ah waxaa galaya hal garsoore oo isagu go’aan ka gaaraya qadiyadda hortaala.
- Dacwadaha ciqaabta gaarka ah oo ay ayaduna qasab tahay in ay galaan saddex garsoore iyo qeybta ciqaabta ciidamada qalabka sida.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Maxkamadda gobolka iyo gobolada kaleba waxa ay leeyihiin qeyb ciqaab ciidan oo ka kooban gudoomiyaha maxkamadda gobolka iyo labo xubin oo ka tirsan ciidanka, waxayna galaan dembiyada aan ahayn awoodda qeybta ciqaabta ee ciidamada qalabka sida waxayna awood u leeyihiin sida sharciga uu tilmaamay Ciqaab dil ah, Xabsi daa’in ama xabsi aan ciqaabtiisa ka hooseynin ugu yaraan toban sano.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qeybta caadiga ah iyo Qeybta gaarka ah (Assize) waxa ay ku qaban karaan dhageysiga dacwadda meel ka baxsan xaruntooda hadii aysan dhaafsiisnayn xuduudda maxkamadda marka loo arko inay lagama maarmaan tahay de-dejinta maamulka cadaaladda.
- Waxaa kaloo maxkamadda gobolka ay leedahay dacwadaha la xiriira waaxda canshuuraha, waxayna maxkamadda gobolka raaceysaa sharciga xisaabaadka sida uu u maamulo maadadaasi dacwadeedu ay hortaalo.
- **Maxkamadda rafcaanka** waxa ay xarun ku leedahay gobol kasta oo jamhuuriyadda soomaaliya goboladeeda ka mid ah sharci ahaana waxaa hoos yimaada dhammaan dhulka uu ka kooban yahay gobolkaasi.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Maxkamadda rafcaanka waxay leedahay labo qeybood oo kala ah:

A. Qeybta madaniga
B. Qeybta ciqaabta

Waxayna leedahay qeybta ciqaabta ah oo ka kooban labo qeybood:

1.Qeybta Ciqabta ee caadiga ah

2. Qeybta rafcaanka dacwadaha ciqaabta ee gaarka ah (Assize)

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qeybta caadiga ah ee maxkamadda rafcaanka waxaa dacwadeeda ka garnaqaaya ama go’aan ka gaaraya hal garsoore, rafcaanka laga soo qaato go’aannada ama xukunada kasoo baxa maxkamadaha degmooyinka iyo gobolka qeybtooda ciqaabaha caadiga ah.
- Qeybta gaarka ah (Assize) ee rafcaanka xubnaha ka garnaqaaya waxa ay ka kooban yihiin gudoomiyaha maxkamadda rafcaanka iyo saddex xubnood ee garsoore dadweyne, waxayna galeysaa rafcaanka laga soo qato go’aannada qeybta gaarka ah (Assize) ee maxkamadda gobolka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Waxaa maxkamadda rafcaanka ee magaalo madaxda muqdisho iyo gobolada ka dhisan qeybta ciqaabta ciidamada ee rafcaan oo ka kooban gudoomiyaha maxkamadda rafcaanka iyo afar xubnood ee ciidan,waxayna gashaa dacwadaha inta ku siman xuduudeeda dhuleed oo ah inta uu ku fadhiyo maxkamadda gobolka ee xukunka soo saartay, waxaa kaloo maxkamadda rafcaanka ay awood u leedahay iney gasho dacwooyinka la xiriira canshuuraha oo ay maxkamadda gobolka ay hore go’aan uga soo gaartay waxayna raaceysaa sharciga xisaabaadka sida uu u maamulo mawduuca dacwadaas.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Maxkamadda sare** waxa ay xarun ku leedahay magaalo madaxda dalka ee Muqdisho waxayna awoodeeda xuduud dhuleed ku baahsan tahay dhammaan dalka jamhuuriyadda waxayna xubnaheeda ka kooban yihiin:

A. Gudoomiyaha Maxkamadda sare
B. Ku xigeenka gudoomiyaha
C. Affar la’ taliye yaal ah.

- Maxkamadda sare waxay si’ dhab ah u xaqiijisaa ilaalinta iyo midnimada fasiraadda sharciga waxayna qabataa hawlo kale ee dastuurka iyo hadii uu jiro sharci loo xilsaartay.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Maxkamadda sare fadhigeeda caadiga ah waxa ay dacwadda ku gashaa saddex xubnood.
- Waxa ay maxkamadda sare ee dalka awood u leedahay inay gasho :

a. Rafcaannada lidka ku ah go'aannada ay soo saaraan darajada labaad ama darajo kasta ee hay'adaha garsoorka jamhuuriyadda.
b. Rafcaannada lidka ku ah go'aannada kama dambeysta ah ee maamulka dawladda.
c. Rafcaannada la' xiriira la' xisaabtanka saraakiisha maamula hantida guud.
d. Cabashooyinka dib u eegidda go'aannada ciqaabta ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Maxkamadda sare ee dalka fadhigeeda loo dhan yahay waxa ay ku go’aamisaa tiro aan is badelin ee shan xubnood ah waxayna gashaa:

A. Cabashooyinka ku saabsan sugnaanshaha cadeymo rasmi ah ee la’ xiriira ka mid noqoshada xubnaha golaha shacabka ee qaranka.

B. Is qab-qabsiga xuduud dhuleedka iyo midda awoodeed ee dhex marta dhowr hay’ad garsoor ee jamhuuriyadda.

C. Maado kasta oo gudoomiyaha maxkamadda sare u arko inay muhiin tahay oo aanan ku xusneyn faqradaha sare.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Qeybta 2aad:** Xubnaha Dacwad oogista
- **Xafiiska Xeer Ilaaliyaha:**

Xafiiska Xeer ilaaliyaha xaruntiisu waa muqdisho wuxuuna ka kooban yahay:

a. Xeer ilaaliyaha guud
b. Afar ku xigeennadiisa ka mid ah sida ku cad dikareetada sharciga Lr.3 ee ku Tr. 12/June/1962-kii kadib markii baarlamaanka uu u wakiishay xukuumadda inay soo saarto xeerka nidaamka garsoorka sida ku cad sharci Lr.5 soona baxay 30/janaayo/1962.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Mas’uuliyadda xafiiska xeer ilaaliyaha guud waxa ay ku cadahay sharciga sare ku xusan sida:

1. Xafiiska xeer ilaaliyaha waxaa waajibaadkiisa ka mid ah dhowrista sharciga, Difaaca xuquuqda dawladda, Caruurta yar-yar ee aan qaan-gaarka ahayn, Dadka Naafada ah, sidaasi darteed Xafiiska xeer ilaaliyaha guud:-

A. Xeer ilaaliyaha guud ama ku xigeennadiisa ama saraakiisha iyo koormeere-yaasha booliska ee uu sharciga u igmaday wuxuu oogaa dacwad ciqaabeed, wuxuu diyaariyaa dacwooyinka la’ xiriira fal-dembiyeedyada, wuxuu ka qeyb galaa dhageysiga dacwadaha.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

B. Wuxuu dhaqaajinayaa dacwadaha madaniga ah markasta oo ay ku jirto danta guud ee cadaladda, wuxuuna ka qeyb galayaa dhageysigooda.

C. Sida sharcigu uu tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato dacwadaha ciqaabta mararka qaarkoodna dacwadaha madaniga ah.

2. Waxaa kaloo xafiiska xeer ilaaliyaha mas'uuliyadiisa ka mid ah hawlaha dabagalka iyo ka hortaga dembiyada waxaana fuliya ciidanka booliska ayagoo ka amar qaadanaaya xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Xafiiska xeer ilaaliyaha guud waxay mas’uuliyad ka saaran tahay kormeeridda iyo ilaalinta xabsiyada iyo dhismooyinka kale ee dad lagu xiro sida uu tilmaamayo xeerka nidaamka xabsiyada ee tirsigiisu uu yahay sharci Lr.7 Soona baxay 30/12/1971 (Prison Law).

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Dhinacyada dacwadda ciqaabta**

## Dhinaca 1aad

1. **Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud** waxa uu dhinac ka yahay dacwadaha ciqaabta ah wuxuuna adeegsanayaa awoodda iyo waajibaadka ku xusan Qod. 8aad ee xeerka nidaamka garsoorka.
2. Dhageysiga dacwad kasta oo ciqaab ah xafiiska xeer ilaaliyaha guud waxaa ku matelaayo:

a. Xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa marka dacwaddu ay taagan tahay maxkamadda sare horteed.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

a. Xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa marka dacwaddu ay taagan tahay maxkamadda sare horteed.
b. Xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa ama sarkaal boolis oo uu magacaabay xeer ilaaliya guud oo darajadiisu ka sareyso isbatoore maxkamadda rafcaanka gorteeda.
c. Xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa ama sarkaal booliska ah oo uu magacaabay xeer ilaaliyaha guud oo darajadiisu ka sareyso isbatoore wuxuu ka qeyb geli karaa dacwadda ciqaabta ah ee hortaala maxkamadda gobolka hadii ay jirto xaalad deg-deg ah taliyaha qeybta booliska ayaa hawshaasi u magacaabi kara sarkaal boolis ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

d. Xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeenadiisa ama taliyaha saldhiga ama sarkaal uu magacaabay ayaa waxa uu ka qeyb galayaa dacwad ciqaab ah oo hortaala maxkamadda degmada

## Dhinaca 2aad

**Eedeysanaha:** Sida ku cad Qod. 13aad ee XHCS.

1. Eedeysanaha waa qofka xataa aan lagu soo qaban amar qabasho oo ay soo saartay hay'ad garsoor laguna haayo xaalad xarig ah oo kasoo fulay hay'ad garsoor ama loo soo saaray u yeeritaan inuu maxkamadda hor yimaado, qofkaasi waxaa loo qaadanayaa eedeysane mudadaasi dacwadda marxalad kasta oo ay dacwaddu mareyso ilaa uu kasoo baxo xukun xiqaab ah ama mid sii deyn ah oo kama dambeys ah ama ilaa laga go'aaminaayo in aan dacwad lagu soo oogin go'aan kaasi oo u dhigma sii deyn amaa ilaa laga ansaxinaayo go'aanka dacwadda lagu owdaayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Eedeysanaha waxaa loo qaadanayaa inaanu ahayn dembiile ilaa iyo xukun kama dambeyn ah kasoo baxaayo.
3. Eedeysanaha kadib marka ugu dambyntii ciqaab lagu xukumo ama lasii daayo ama marka go’aan ah in aan dacwadda lasii wadi karin si’ sharci ahna loo siiyo mar kale isla dhacdadii laguma eedeyn karro, xataa hadii dhacdadaasi marka loo eego ay dhisayso dembi kii hore ka duban.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Dhinaca sadexaad:**
- **Dhibanaha:**

1. Dhibanaha waxaa loola jeedaa qofka ay dhibta kasoo gaartay dembiga dhacay isaga ama qof uu markaasi ka dhigtay wakiil sharci.
2. Dhinaca dhibanaha ah waxaa u banaan inuu maxkamadda ka codsado in eedeysanaha laga siyo magdhaw qasaarihii mas'uuliyadda madaniga ah ee isagu kasoo gaartay markuu dhacaayey fal dembiyeedka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Dhibanaha wuxuu maxkamadda u gudbin karaa codsi qoraal ah ama hadal ahaan qasaarihiisa madaniga ah ee kasoo gaaray fal-dembiyeedka ka hor intaanay bilaabanin gabo-gabeynta xafiiska xeer ilaalinta ee dacwadda ciqaabta ah sida ku xusan Qod.119 XHCS.

- **Difaaca eedeysanaha:**

1. Eedeysanaha waxaa difaaci kara qareen kali ah ama dhowr qareen sida uu qabo Qod. 15aad XHCS.
2. Sida ku cad Qod. 14aad ee xeerka nidaamka garsoorka ee tirsigiisa aan sare kusoo xusay maxkamaddu waxa ay u magacaabeysaa qareen difaaca xafiis ahaan mar kasta oo aanu iskii qareen u qabsan karin dacwaduna ay tahay mid difaaceeda sharciga uu waajibinaayo in uu qareen difaaco eedeysanaha.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Magacaabista qareenka difaaca xafiiska looma diidi karo iyadoo aanay jirin cudur daar macquul ah.
4. Marka eedeysaneyaashu ay badan yihiin isla markaana aysan jirin dano is qilaafsan waxaa maxkamadda horteeda ka difaaci kara qareen kaliya oo ay ayagoo dhan si’ wadajir ah u wakiishaan.
5. Eedeysanaha lasoo xeray wuxuu xaq u leeyahay isagoo iqtiyaarkiisa inuu si xur ah xaq ugu leeyahay inuu qabado qareen ka difaaca dhammaan marxaladaha dacwadda.
6. Dhinaca dhibanaha ah wuxuu wakiilan karaa qareen kaliya.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Waajibaadka qareenka difaacaya Eedeysanaha:**

1. Qareenka difaacaya eedeysanaha hadii aysan jirin dabab macquul ah ma’ dayaci karo hawsha difaaca eedeysanaha kamana maqnaan karo fadhiyada dhageysiga dacwaddasi’ eedeysanuhu uusan u waaynin xuquuqdiisa difaaca.
2. Hadii qareenka difaacaya eedeysanha uu ku xad gudbo hawshii loo igmaday maxkamddu waxa ay amri kartaa :

a. Inuu bixiyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn sh. So. 5000 uuna siiyo eedeysanaha mag dhaw ahaan.
b. Inuu bixiyo wadar lacageed oo aan ka badnayn sh. So 2000 kuna shubo qasnadda qaranka.
c. Waxaa laga mamnuucayaa ku shaqeysiga xirfadiisa muddo aan ka badnay hal sano.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- ka baaqashada qareenka dhibanaha ee xilkiisu marnaba ma joojineyso iney dacwaddu socoto.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Ogista dacwada ciqaabta iyo dhicitaanka fal dembiyeedka**
- Haddii uusan sharciga si kale u tilmaamin oogista dacwooyinka ciqaabta ee caadiga ah waxaa muhiim ah in la helo arimaha soo socda midkood:

1. In la helo war ku saabsan dhicitaan fal dembiyadeed.
2. In la helo ashtakooyin ku saabsan inuu dhacay fal dembiyeed.
3. In la helo war bixin ku saabsan inuu dhacay fal dembiyeed.

Marka la helo xaaladaha kor ku xusan midkood waxaa isla markiiba lagu hagaajinayaa hay'adaha ku shaqada leh oo kala ah:

A. Garsoore maxkamadeed
B. Xafiiska xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka
C. Sarkaal kasta oo boolis ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Waxaan soo qaadaneynaa xaaladaha kor ku xusan ee dacwadda ciqaabta saldhiga u ah sida:

1. Warbixinta ku saabsan inuu dhacay fal dembiyeed uuna soo gudbiyey sarkaal guud ama qof u xil saaran hawl guud ee ogaada dhicitaanka fal dembiyeed ka mid ah kuwa qaran ahaan ay waajib tahay inuu soo oogo xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka, waa in uu si dhaqsi ah ugu war geliyaa hay'adaha shaqada ku leh si loo oogo dacwad ciqaab ah.
2. Xaaladda kale ee ay ku oogmi karto dacwad ciqaab ah waxaa ka mid ah war bixin uu bixiyo sarkaal xirfadle caafimaad oo isagu markaasi war bixintiisa ku cadeeya inuu dhacay fal dembiyeed ah kuwa qaran ahaan ama xafiis ahaan loo oogo dacwad ciqaab ah, waxaana saaran sarkaal kaasi xirfadlaha ah ee dhinaca caafimaadka in sida ugu dhaqsiyaha badan ugu war bixiyo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Soo sheegidda dhicitaan fal dembiyeed ee dad weynaha, waxaana muhiim ah in la helo:

A. Muwaadin kasta oo ogaada dhicitaanka fal dembiyeed lid ku ah karaamada iyo jiritaanka qaranka oo uu sharcigu ciqaabtiisa ka dhigaayo dil ama xabsi daa'in waa in sida ugu dhaqsiyaha badan uu usoo sheegaa dhicitaanka dembigaasi.

B. Waajibkaasi waxa uu saaran yahay qof kasta oo muwaadin ah xitaa hadii uusan ahayn dhibane oo ogaada dhicitaanka fal dembiyeedyada xafiis ahaana in la dhaqaajiyo ay waajib tahay, waxaana loola jeedaa qaranka ayaa dhibane ka ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

4. Ashtakada waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay dhibaato kasoo gaarto fal dembiyeed aan ahayn kuwa qaran ahaan in dacwadooda loo oogo waxa uu gudbin karaa ashtako ama dacwo hay'adaha ku shaqada leh si loo bilaabo oogitaanka dacwadda ciqaabta.

- waxaana jira xaalado aan la adeegsan karin oogista dacwadda ciqaabta ah ashtako la gudbiyey waxaana ka mid ah:

A. marka qofka dhibanaha ah uu ka tanaasulo xaqii ashtakada ahaa ee uu sharcigu siyey.

B. Marka uu furto dacwad madani ah kuna saabsan mag-dhaw khasaare kasoo gaaray fal dembiyeed dhacay.

C. Marka heshiis sulux ah laga gaaro khasaarihii ka dhashay fal dembiyeedka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Inta xaaladood ee aan sare kusoo xusnay oo saldhig u noqon kara in la oogo dacwad ciqaab ah oo ay ka mid yihiin qaababka war bixinnada loo diyaariyo iyo ashtakooyinka waxa ay noqon karaan qoraal ama kuwo hadal ama af ahaan loo soo gudbiyo.

A. Hadii ay warbixinta ama ashtakadu ay qoraal tahay waxaa saxiixaya qofka ay quseyso.

B. Hadii loo soo gudbiyo Qaab hadal ama af ahaan ah waxaa diiwaan gelinaayo maamulkii la hor geeyey kadibna uu aqrinaayo cidda ay quseyso kana saxiixaayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Baaritaanada Booliska.**

Baaritaanada Booliska waxa ay muhiim u yihiin jiritaanka xeerka habka ciqaabta sababtoo ah inta badan eedda uu so gudbiyo xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka ee isagu ah dacwad oogaha waxa ay ku saleysan tahay baaritaannada ay boolisku sameeyeen ee quseeya faal dembiyeedyada kala duwan, waxayna leeyihiin xeer gaar ah oo la yiraahdo xeerka ciidanka xooga ee booliska kaasoo ah Sharci Lr.2 soona baxay 23/12/1972-kii, waxaana xeerkaasi ku cad waajibaadkooda boolis ahaan iyo qaab dhismeedka ciidanka booliska iyo mas'uuliyadooda dhinaca darajada.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Marka laga hadlaayo baaris ku saabsan fal dembiyeed lagana diyaarinaayo gal dacwadeed waxaa ciidanka booliska ay ku shaqeynayaan awaamiirta xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka sida ku cad sharci Lr.3 ee 12/june/1962-kii ahna sharciga nidaamka garsoorka Qod. 8aad faqradiisa 2aad maadaama uu yahay midka kaliya ee dhaqaajin kara ama soo oogi kara dacwad ciqaab ah.
- Baaritaannada Booliska waxaan kusoo koobayaa shan faqradood oo kala ah:

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

1. Sarkaal kasta ee boolis oo mas’uul ka ah saldhig hadii ay soo gaarto war bixinno ama ashtakooyin ama war ku saabsan inuu dhacay fal dembiyeed waxaa waajib ku ah:

A. Inuu ogeysiyo xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka iyo maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaasi iqtisaas ahaan.

B. Wuxuu isku duba ridaa xogtii uu helay isagoo kaashanaayo baareyaashiisa qibradda u leh baarista fal dembiyeedyada si loo helo baaritaan ku saleysan xaqiiqo soona koobaya wixii macluumaad ah ee uu u arko iney muhiim u yihiin baaritaanka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Sarkaalka booliska ah ee fulinaaya baaritaanka waxaa laga doonayaa:

A. Wuxuu wareysanayaa qofka uu u arko inuu ka war haayo duruufo kasta oo ay dacwaddu leedahay.

B. Wuxuu diiwaan gelinayaamacluumaad kasta oo uu baaristiisa ku helay wax tarna u leh baarista dacwadda.

3. Hadal cad oo la diiwaan geliyey markii uu socday baarityaanka loona adeegsan doono caddeyn lid ku ah eedeysanaha gar qaadistiisa dhedeeda.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

4. Marka lagu jiro waqtiga baaritaanka ee loo arko in ay lagama maarmaan tahay amarxeritaan ama mid fatashaadeed ama mid xayiraadeed sarkaalka fulinaaya baaritaankaasi waxa uu ka codsanayaa maxkamadda awoodda u leh in ay bixiso amarka noocaasi ah, waxayna isla markiiba ogeysiineysaa xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka oo isagu dhinac ka ah dacwadda.
5. Marka ay jirto xaalad deg deg ah lagama maarmaana ka dhigeysa in sarkaalka booliska ee fulinaaya baaritaanka waxaa isagoo aan wadanin amar maxkamadeed uu awood u yeelanayaa:

A. Wuxuu xiri karaa qofka uu uga shakiyo inuu dembi galaayo.
B. Waxaa kaloo oo uu fulin karaa fatashaad ama xayiraad isagoo aanan haysanin amar maxkamadeed.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Sarkaalka booliska ah ee fulinaaya baaritaanka waxa uu maalin kasta diiwaan gelinayaa faah faahinta baaritaanka isagoo adeegsanaayo xusuus qor kuna xusaayo:

A. Maalinta uu bilaabay baaritaanka iyo maalinta uu dhammeeyey.
B. Talaabooyinka la qaaday xilligii baaritaanka uu socday.
C. Duruufaha kasoo baxay baaritaanka.
D. Cadeymaha la helay.

Waxa kaloo uu diiwaan gelinayaa dhammaan awaamiirta ay siyaan mas'uuliyiinta isaga ka sareeya, maxkamadaha iyo xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Dhammaadka Baaritaanka Booliska ama gun-gaarka gal dacwadeedka**

Waxaa muhiim ah marka lasoo gabo-gabeynaayo baaritaanka booliska in la helo arimaha soo socda sida:-

1. Sarkaal kasta oo boolis ah kana mas'uul ah baaritaanka gal dacwadeedka ciqaabta ah waa in uu ku soo dhammeystiraa sida ugu dhaqsiyaha badan lagamana ogolaanaayo dib u dhac sabab u noqon kara in uu eedeysanuhu uu xernaado ayadoo aan la hor geynin maxkamadii awooda u lahayd qaadista fal dembiyeedka lagu eedeynaayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Taliyaha saldhiga booliska ama sarkaalka maamula booliska ee ka mas'uulka ah baaritaanka dacwadaasi marka uu soo gebo-gabeeyo waxa uu diyaarinaayaa war bixinno dhammeystiran oo xaqiiqo ah kana kooban:

A. Xaqiiqooyinkii dacwadda iyo duruufihii ku xeernaa oo saameynta ku yeelan karaayey gar maqallo ciqaabeed oo la qaado.
B. Faah-faahin ku saabsan cadeymaha la helay mudadii ay baaristu socotay.
C. Faah-faahin astaamaha guud ama wax kasta oo lagu aqoonsan karro eedeysanaha, dhimaca dhibanaha iyo qof kasta oo haaya war bixin la xiriirta duruufaha dembiga.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Markii lasoo maro intaasoo marxaladood waxaa loo dirayaa xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka war bixinnada uu ka kooban yahay gal dacwadeedka waxaana ka mid ah:

A. Xusuus qorka baaritaanka.
B. Diiwaanka la xiriira baaritaanka
C. Wixii qalab ah ee la qabtay waqtiga ay baaristu socotay kuwaasoo lala xiriirinaayo in loo adeegsaday inuu dhaco fa-dembiyeed.

Waxaa intaasi dheer in qof kasta oo muwaadin ah marka si sharci ah oo sababeysan looga codsado xaalad baahi deg-deg ah ay jirto wuxuu caawimo siinayaa garsoorka, xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo sarkaalka booliska ah si loogu geeyo xabsiga ama looga hortago fakasho qof kasta oo maamulka aynu soo sheegnay amray xeritaaniis ama si looga hortago in la daboolo fal dembiyeed dhacay ama la baabi’iyo raadka fal dembiyeedka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Horgeynta maxkamadda qof eedeysane ah**
  - **XARIGA**
- Guud ahaan xariga wuxuu noqon karaa mid ku yimaado ammar maxkamadeed ama mid ka duban, waxaase muhiim ah in lagu sammeyn karo oo kaliya xaaladaha sharciga uu tilmaamay ama qaabka uu u jideeyey, qofka ay tahay in la xiro waa in loo sheegaa in la xiraayo iyo sababta loo xiraayo, hadii qofka la xiraayo uu xoog kala hor yimaado ciidankii fulinaayey amarka xiritaanka ama uu isku dayo inuu baxsado ciidanka fulinaayey ammarkaas xiritaanka waxa ay isticmaali karaan dhammaan qaababka sharciga ah ee lagama maarmaanka u ah si loo meel mariyo amarka xiritaanka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qofka la xiray lama saari karro xadidaad badan oo xuriyadda looga qaadaayo hadii aysan lagama maarmaan ahayn xuriyad ka qaadidiisa mid looga hor tagaayo inuu fakado ama uu baxsado.
- Hadii ay cadaato qofka la xiray in xarigiisa uu ahaa mid si gef ah loo sameeyey waxaa waajib ah in qofka la xiray si deg deg ah loo sii daayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Gelitaanka goobaha sida gaarka ah loo leeyahay ayadoo la fulinaayo amar xeritaan**
- Sarkaal kasta oo fulinaaya amar xarig qof eedeysane ah isagoo ku helay sabaha kala ah, isagoo faraha kula jiray fal dembiyeed:

a. Marka u jiro qoraal amar maxkamadeed oo qof lagu soo xiraayo waxaa sarkaalka fulinaaya uu geli karaa goob kasta isagoo aan wadanin amar maxkamadeed oo ay ku jiraan guryaha la degan yahay iyo halkii uu qofka la xiraayo iska qarin karo marka ay jirto baahi deg deg ah in la qaado talaabadaasi iyo marka ay jiraan war bixinno sheegaya in hadii la raadsado amar maxkamadeed aan la heli kareynin qofka la xiraayo iyadoo laga gaashaamanaayo fursad uu qofku ku baxsan karro ama fursad uu ku bir burin karro ama uu wax ka badel ku sameyn karro cadeymaha.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

b. Hadii qofka mas'uulka ka ah goobta ama guriga uu diido ogolaansha gelitaanka xoog ayaa loo isticmaali karaa si loo suurta geliyo gelitaanka.

c. Marka goobta la doonaayo in la galo si loo fuliyo amarka xeritaanka ah ay joogto haweeney dhaqankeedu aanu ogoleyn iney dibadda usoo baxdo, markaasi sarkaalka amarka xariga ah fulinaayo wuxuu ayadu usoo jeedinayaa inta aanu goobta gelin inuu u ogol yahay fursad kasta oo macquul ah oo ay ku gasho meesha munaasabka ku ah ama goob ku filan oo ay isku qariso.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **Baaritaanka qofka xiran**

Qofka wax xiraaya isagoo aan u heysan amar maxkamadeed wuxuu baaritaan ku sameyn karaa:

a) Qof la xiray
b) Goobta lagu xiray
c) Goob kasta oo uu qofka la xiray galay markii uu isku dayey inuu ka baxsado xariga

Qofka sameynaayo baaritaanka wuxuu diyaarinayaa dhammaan war bixinnada la xiriira baarista ee ku saabsan qofka la xiraayo amase goobta la baaraayo kaasoo loo isticmaali karro cadeyn ahaan marka lasoo oogo dacwadda ciqaabta ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **War gelinta xeritaanka**

Sarkaal kasta oo maamula saldhig boolis ama taliyaha saldhiga booliska waa in uu ku war geliyaa sida ugu dhaqsiyaha badan xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo maxkamadda awoodda u leh xarig kasta oo qof lagu soo xiro saldhiga booliska ama sii deyn kasta oo lasii daayo qof ku xirnaa saldhiga booliska, waxayna war gelintiisa uu ku saleynayaa inta ay gaarsiisan tahay xuduudihiisa deegaanka ee uu maamulkiisu gaaro, waxaana waajib ku ah in uu cadeeyo asbaabaha sii deynta ama xariga isagoo waafajinaayo sharciga.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Waxaa mararka qaarkood dhici karta in qof la xiro ayadoo uusan jirin amar maxkamadeed waxaana awoodaasi uu sharcigu siinayaa:- Garsooraha, Xeer ilaaliyaha guud iyo ku xigeenadiisa iyo sarkaal boolis ah, waxaa kaloo xiritaan sameyn kara qof shacab ah, wuxuuna xiri karaa qof markaasi uu u arko in la xiro isagoo aanan wadanin amar maxkamadeed, wuxuuna qofkaasi shacabka ah waajib ku ah ayadoo uusan jirin dib u dhac in uu isla markiiba ku wareejiyo sarkaalka booliska ah ee maamulka deegaanka uu ka dhacay xiritaanka kaadibna la hubiyo asbaabta xeritaanka lana raaco habraacii sharciga ahaa.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xariga waajibka ah ee dadka lagu qabto iyagoo faraha kula jira fal dembiyeed.

Qofka waxaa lagu xiri karaa ayadoo aan la wadanin amar maxkamadeed hadii lagu qabto isagoo faraha kula jira dembiyada:

a. Dembi kasta ama isku day dembi kasta oo lid ku ah shaqsiyadda qaanuuneed ee qaranka kaasoo ciqaabtiisu tahay xarig ama ciqaab culus.
b. Dembi kasta oo gelitaankiisa ama isku daygiisa oo ku saabsan:

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Ka fakasho xabsi sharci ah
- Burburin iyo tuugo
- Dil ama gawracaad .

Waxaa kaloo jira fal dembiyeedyo kale oo uu sharcigu si cad u qeyxay in hadii ay dhacaan uu xarigooda uu waajib noqonaayo, waxaana ka mid ah:

1. Dembi kasta oo sababi kara inuu bulshada ku baaho cuduro khatar ah sida: Sumeynta biyaha iyo cuntada.
2. Kufsiga, salaaxidda, galmada aan dabiiciga ahayn oo xoog lagu galo, u qabsasho ujeedo salaaxid ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Dembiyada ku saabsan soo tuurista ilmaha uurka ku jira oogolaansho la’aan.
4. Dil caado ah, dilidda ilmaha yar, ogolaansho ku dilidda ay la socoto duruuf dembiga cusleysa, dhaawac culus ama mid aad u culus, dil kas ah, dagaal safeyn ah oo wata duruufaha cusleeya dembiga.
5. Ceebeyn wadata duruufaha dembiga cusleeya marka ay tahay dalabka xeer ilaalinta lagu oogo.
6. Adoonsi xoog ah, suuq geynta iyo ka ganacsiga adoomaha, xoog ku haysashada qof bani’aadam ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

7. Xayirasho Qof bani’aadam ah
8. Tuugo ay tahay in xafiis ahaan loo oogo, burcadnimo, baadis, dil ama dhaawac loo geysto xayawaannada la dhaqdo  oo uu qof kale leeyahay kaasoo xafiis ahaan loo oogayo.
9. Dembi kasta oo kale oo sharcigu waajibinaayo iney waajib tahay qofkii gala qabashadiisa marka uu faraha kula jiro.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qabashada ama xariga ikhtiyaariga ah ee dadka lagu qabto iyagoo faraha kula jira fal dembiyeed .

1. Sida aan hore usoo sheegnay qofka waa la xeri karaa amar maxkamadeed la'aantii marka lagu qabto isagoo faraha kula jira fal dembiyeed sida:-

A. Fal dembiyeed kasta oo ciqaabtiisa ugu weyni ay ka badan tahay hal sano o xarig ah ama fal dembiyeed ciqaabtiisa ay culus tahay

B. Ciqaab uu xarig ku jiro marka uu dembigu la xeriiro fal dembiyeedyada so socda:

- Sakhraamid
- Dab, Rasaas ama Qarax
- Ciyaarta Qamaarka
- Haysasho aan caqligal ahayn kuna saabsan wax yaabaha qiimaha leh sida xoolaha, qalab wax lagu furo ama qufullada lagu saaro
- Wax yaabaha qatarta ah ee maanka dooriyo .

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Xariga la xiraayo qofka dembiga faraha kula jira waxaa la sameyn karaa marka uu dembigu yahay midka lagu oogo dalabka qofka dhibanaha ah, marka uu dhibanuhu uu ku wargeliyo inuu dhacay fal dembiyeed garsooraha, xafiiska xeer ilaaliyaha guud ama sarkaal boolis ah, isagoo ujeedadiisu ay tahay inuu sameeyo ashtakadaas.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qofka la xiray amar maxkamad la’aantii waa in la horgeeyaa garsoore.

**1.** Qofka la xiray amar maxkamadeed la aantii waa in isla markiiba iyo xaalad kasta waqti aan ka badnayn afartan iyio sideed saacadood marka laga soo bilaabo waqtiga xeritaankiisa lagu horgeeyaa maxkamadda awoodda u leh qaadista fal dembiyeedka oo uu galay amase maxkamadda ugu dhaw goobta lagu xeray iyo waqtiga la sheegay ee afartan iyo sideedda saacadood ah aanu ku jirin waqtiga loo kala soconaayo goobta xarigu ka dhacay iyo goobta ay maxkamddu ku taalo

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

**2.** Sarkaalka booliska ah ee qofka xiran horgeeyey garsooraha isla markaasna waa in uu u habeeyaa una gudbiyaa warbixin kooban oo iftiimineysa in qofkaasi la xiray, dhinacii dhibanaha ahaa iyo qof kasta oo haaya warbixin la xiriirta dhicitaanka fal dembiyeedka,.

**3.** Garsooraha markuu daraasaad ku sameeyo war bixintaasi kooban ee uu soo gudbiyey sarkaalka booliska ah waxaa u bannaan:-

**a.** Hadii dacwaddu waafaqsan tahay mas'uuliyadda xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka ka hor billowga dhageysiga sida ku cad Qod. 70aad ee xeerka habka ciqaabta Soomaaliyeed faqradiisa 2aad waxa uu amrayaa in aan lagu oogi karin dacwad qofka xiran isagoo go'aankiisa waafajinaayo amarka oodista dacwadda iyo tilaabooyinka la xeriira sida ku cad Qod 77aad XHCS, wuxuuna amrayaa in isla markiiba lasii daayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

**b.** Hadii dembiga la galay uu yahay mid amar xeritaan maxkamadeed aan loo heleynin oo loola jeedo xaaladaha soo saarista amarka qabashada uu yahay mid qasab ah sida ku cad Qod. 42aad XHCS, iyo xaaladaha soo saarista amarka qabashada ikhtiyaariga ahsida ku cad Qod 43aad ee XHCS, ama aan lagu fulinin xeritaanka si waafaqsan tilmaamaha Qodobada 35aad oo si cad u qeexaya xeritaanka waajibka ah dadka lagu qabto iyagoo faraha kula jira fal dembiyeedyada, Qabashada ikhtiyaariga ah oo ku xusan Qod. 36aad iyo Qod. 38aad ee XHCS oo ah qabashada ikhtiyaariga ah iyo waajibaadka ka war bixinta macluumaad ku saabsan shaqsiga oo ku xusan Qod. 50aad ee XHCS, markii uu xaqiiqsado dhammaan arimahaasi sare ku xusan garsooraha waxa uu amrayaa in isla markaaba lasii daayo Qofka xiran.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

**c.** Xaaladaha kale wuxuu ansixinayaa xariga qofka xiran wuxuuna u dirayaa xabsi ku hayn ku meel gaar ah sida uu qabo Qod 46aad ee XHCS,waxaa kale oo uu awood u leeyahay in uu damiin kusii daayo qofka xiran isagoo waafajinaayo Qod. 59aad ee XHCS.

4. Hadii garsooruhu xariga qofka dembiilaha ah aanu ku ansixinin middo sideed maalmood gudohood ah laga bilaabo maalintoii uu dhacay fal dembiyeedka waxaa xarigaasi loo aqoonsanayaa xaaladaha lagu tilmaamay faqradaha kor ku xusan ee xarafka C ee faqradda sadexaad, garsooraha waa in uu:-

A. U sharxaa qofka xiran nuxurka eedda loo haysto.
B. ku war geliyaa qofka xiran in marxaladaani dacwaduu mareyso aan looga baahnayn inuu bixiyo wax war ah balse war bixin kasta oo uu bixiyo loo adeegsan doono cadeymo isaga lid ku ah
C. Inuu qoro war kasta oo qofka xerani uu bixiyo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

**5.** Garsoore wax ma weydiin karo qofka xeran hadii:-

a. Qofka xirani uusan dooneyn in uu war bixiyo
b. In su'aalaha garsooraha aan looga dan lahayn in lagu bayaaniyo warka uu sidaa ku bixiyo qofka xiran.

**6.** Talaabo kasta oo uu garsoorughu qaado si waafaqsan tilmaamaha kor ku xusan waa in isla markiiba sarkaalkii qofka xiran garsooraha hor keenay uu ogeysiyaa:

**a.** Xafiiska xeer ilaaliyha guud

**b.** Maxkamadda Ikhtisaaska u leh, waa hadii qofka xiran aan markiisii horeba la hor geynin garsoore ka tirsan maxkamadda ikhtisaaska u leh.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Xeritaanka Amar maxkamadeed ah (QOD. 40 XHCS)

1. Amarka qabashada waxaa soo saari karo oo kaliya:

A. Garsoore awood u leh laga bilaabo xilliga dacwadda ka bilaabato maxkamadda darajada 1aad.

B. Gudoomiyaha maxamadda awooda u leh qaadista dacwaddaasi marxalad kasta oo dhageysiga dacwadda ay mareyso.

Si loo soo saaro amar qabshao maxkamadeed waxaa muhiim ah in la helo jiritaan asbaabo la rumeysan karo inuu dembi dhacay iyo in eedeysanaha xeran uu yahay kii dembiga galay.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **AMARKA QABSHADA EE MAXKAMDEED**

1. Qoraal kasta oo ay ujeedadiisu tahay amar qabasho waxa uu leeyahay qaab uu sharcigu tilmaamay oo loo qoraayo marka lasoo saarayo, waxaana waajib ah in la raaco qaab qoraalka amarka qabashada ee sharciga uu ku xusay Qod. 41aad ee XHCS, waxaana muhiim ah inuu u qornaado qaabka soo socdo.

a. Magaca maxkamadda soo saartay amarka qabashada
b. Taariikhda amarka qabshada lasoo saaray
c. Astaamaha eedeysanaha oo faahfaahsan ama hadii aan la garaneynin tilmaamo uu leeyahay qofka la xiraayo oo si caqli gal ah u cayimaayo.
d. Tiirarka lagama maarmaanka ah ee uu ku dhisan yahay fal dembiyeedka amarka qabashada loo maraayo
e. Saxiixa garsooraha iyo shaabadda maxkamadda soo saartay amarka qabashada.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- 2. Qofna laguma sii  deyn karo hadii ay dhacdo qaabka amarka qabshada lagu xiray qofka uu leeyahay ceeb.

Waxaa jira xaalado soo sarita amarka qabashada uu yahay mid qasab ah waxaana ka mid ah.

1: Amarka qabsho ama xariga waxaa lasoo saarayaa marka uu lid ku yahay qofka lagu eedeeyey:

a. Dambiyo kasta oo ku xusan Qod. 35aad
b. Dambiga ciqaabtiisa ugu weyni ay tahay xarig aan ka yareyn 10 sano ama ciqaab ka culus
c. Dambi kasta oo kale oo soo saarista amarka qabashada sharciga uu qasab ka dhigaayo

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- 2. Amarka qabashada waxaa kale oo lasoo saarayaa markay yimaadaan xaaladaha soo socda midkood:

A. Dambiyada ku xusan Qod. 47aad ee XHCS faqradiisa 4aad oo si cad u qeexaysa marka lasii daayo qofka eedeysanaha ah si waafaqsa faqradda 1aad ee Qod 47aad garsooruhu waxa uu eedeysanaha ku waajibinayaa qaab walba oo uu u arko iney ku haboon tahay si uu ku hubiyo in eedeysanuhu hor yimaado maxkamadda awooda u leh .

B. Marka la helo tilmaamaha faqradda 1aad ee Qod. 63aad taasoo si cad u tilmaameysa maxkamadda awooda u leh bixinta damiinka si waafaqsan timaamaha faqradda 1aad ee Qod 63aad ee XHCS oo ah bixinta damiinka way ka noqon kartaa damiinka waxayna soo saari kartaa amarka qabshada eedeysanaha hadii la helo arimaha soo socda:

- ✓ Hadii eedeysanuhu jebiyo mid ka mid ah shuruudihii la saaray markii lagu sii deeynaayey dammaanadda.
- ✓ Hadii ay jiraan arimo aasaasi ah oo la rumeysan karo inuu eedeysanuhu ka tagaayo ama ka tagi rabo wadanka.
- ✓ Hadii qadarka dabarka dammaanadda oo loola jeedo lacagta cuuraarta ah aysan ku filnayn in la bixiyo dammaanad.
- ✓ Hadii ay timaado qiyaano, qalad ama sababo la mid ah oo uu la yimaado eedeysanaha.
- ✓ Hadii ay dhacdo mid ka mid ah damiinteyaasha ama damiintaha uu la yimaado sabab maan gal ah kadibna uu dalbado damiinka.
- ✓ Hadii uu dhinto damiinka.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **XAALADAHA SOO SAARISTA AMAR QABASHO IKHTIYAARI AH.**

Amarka qabashada ikhtiyaariga ah waa la soo saari karaa marka ay yimaadaan xaaladaha soo socda:

A. Marka fal dembiyeedka uu galay eedeysanaha ciqaabtiisa xariga ah ayna ka yareyn lix bilood.

B. Hadii qofka eedeysanaha ah cudur daar la'aan uu ku hor tagi waayo maxkamadda xilligii iyo goortii amarka uyeeridda ay ku cadahay iyo amar kasta oo kale oo la xiriira.

C. Hadii ay jiraan arimo la rumeysan karo in qofkaasi ka tagaayo dalka ama uu isku dayaayo inaanu maxkamadda hor tagin, dhammaan xaaladahaasi waxa ay si cad ugu qeyxan yihiin Qod. 43 XHCS.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **FULINTA AMARKA QABASHADA**

1. Qod. 44 XHCS sarkaal kasta oo Boolis ah waa inuu fuliyaa amarka qabashada sida ugu dhaqsiyaha badan.
2. Hadii eedeysanuhu yahay haweeney uur leh ama haweeney xanaaneysa Ilmo ama ruuxa ku sugan yahay xaalad aad iyo aad khatar u ah oo caafimaad darro, maxkamadii soo saartay amarka xariga waxay amri kartaa in la joojiyo fuliinta amarka qabashada ilaa iyo inta ay meesha ka baxayso duruufta loo hakiyey fulinta amarka qabshada.
3. Hadii aanay jirin baahi deg deg ah amarka xeritaanka laguma fulin karo guriyaha deegaanka , saacadaha u dhaxaysa Lixda fiidnimo ilaa iyo Todobada subaxnimo .
4. Sarkaalka fulinaayo amarka qabashada waxa uu ku war gelinayaa qofka la xiraayo nuxurka amarka qabashada iyo in uu xiro ama uu qabto qofka la amray qabashadiisa sida ugu dhaqsiyaha badan.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **HORGEYNTA GARSOORE EE QOFKA LAGU SOO QABTAY AMARKA QABASHADA.**

1. Hadii aan lagu sii deynin dammaanad waafaqsan Qod. 62/2 XHCS qofka lagu soo qabto amarka qabasho waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo horgeeyaa garsooraha awoodda u leh qaadista dacwadiisa ama garsooraha maxkamdda ugu dhaw goobta lagu xiray, hadii garsooraha awoodda u lihi uu joogo meel u jirta 50 km goobtaasi.
2. Hadii lagu sii daayo damaanad ay bixisay maxkamad aan ahayn maxkamadii awoodda u lahayd go’aan kaasi waxaa cusbooneysiin kara ama tirtiri kara garsooraha maxkamadda awoodda u leh.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **XABSI KU HAYNTA KUMEEL GAARKA AH.**

Amarka qofka lagu amraayo in xabsiga lagu sii haayo ee uu soo saarayo garsooraha ikhtisaaska u leh ama maxkamadda ikhtisaaska u leh fal dembiyeedka eedeysanaha uu galay waxaa lagu xirayaa xabsiga ama meel kale, waxaana la hor geynayaa maxkamadda si waafaqsan shuruudaha amarka, mudada xabsi ku haynta dhageysiga dacwadda horteed.

1. Hadii aanay maxkamaddu amrin dhageysiga dacwadda sida ku cad Qod. 75/B xubintiisa 1aad XHCS eedeysanaha waa lasii deynayaa marka waqtiga xarigiisa ay kor u dhaafto:

A. 90 maalmood hadii dembigu noqdo ikhtisaaska garsoor ee qeybta tashiga ee maxkamadda gobolka kaasoo ciqaabta sharciga uu dhigaayo ay tahay dil ama xabsi daa'in ah.

B. 60 maalmood dembiyada kale ee hoos yimaada ikhtisaaska qeybta tashiga ee maxkamadda gobolka.

C. 45 maalmood hadii dembiga uu hoos yimaado ikhtisaaska hal gasroore ee qeybta ciqaabta caadiga ah ee maxkamadda gobolka.

D. 15 maalmood markii dembiga hoos yimaado ikhtisaaska garsoor ee qeybta ciqaabta ee maxkaadda degmada.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

Waxaa intaasi dheer in maxkamadda rafcaanka kadib marka uu codsi uga yimaado xeer ilaaliyaha guud ama mid ka mid ah ku xigeennadiisa waxay ogoklaan kartaa mudada gar suge nimada in la kordhiyo waqti aanan ka badnaan karin muddada ugu badan ee xabsi ku haynta ku cad nooc kasta oo dembiyada kor ku xusan ka mid ah.

2. Mudada xabisgu ujeeddo kasta oo ay leedahay waxay noqoneysaa mid ka bilaabanta maalinta qofka eedeysanaha ah lasoo xiro.

Inta uu xiran yahay eedeysanaha oo aan la gaarin dhageysiga dacwadda uuna ku xiran yahay xabsiga waxaa la hor geeynayaa garsoorah Todobadii maalmoodba hal mar si kastaba ha u dhacdee marka lagu xad gudbo qeybtani waxa uu garsooraha si waafaqsan Qod. 32 XHCS tilaabo uu ka qaadayaa cidda mas’uulka ka ah goobta uu ku xiran yahay eedeysanaha.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

## FATASHAADDA IYO XAYIRAADDA

Amarka fatashaadda ama xayiraadda waxaa kaliya oo soo saari kara garsooraha awoodda u leh ilaa iyo xilliga dhageysiga dacwadda bilaabaneyso maxkamadda darajada koobaad ama Gudoomiyaha maxkamdda awoodda u leh marxalad kasta oo kale oo dacwaddu mareyso, waxaana sharciga uu si cad u qeyxayaa in uu jiro qaab loo qoro amarada fatashaadda ama xayiraadda sida ku xusan Qod. 54 XHCS.

Amarka fatashaadda ama xayiraadda wuxuu mar kastaba uu kusoo bixi karaa labo nuqul oo ka kooban:

a. Magaca maamulka ama hay'adda soo saareyso.
b. Taariikhda uu soo baxay amarka.
c. Sababta loo soo saaray amarka
d. Faah-faahinta astaamaha gaarka ah ee qofka la baarayo ama kan la xayiraayo, hadii aan la garaneynin naaneys kasta ama tilaamo lagu garan karo.
e. Nooca sheyga la xayiraayo iyo meesha uu ku sugan yahay sheygaasi.
f. Faah-faahinta sheyga la xayiraayo iyo qofka gacanta ku haayo ama maamulaayo sheygaasi.
g. Saxiixa mas'uulka soo saaray iyo shaabadda maxkamadda.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

Waxaa jira xaaladaha lasoo saari karo amarrada fatashaada iyo xayiraadda:

1. Amar baaritaan ama xayiraad waxaa lagu soo saari karaa:

a. Marka ay jiraan sababo la rumeysan karo in sheyga ku lug leeyahay oo ay suurta gasho in la helo ruux cayiman ama meelo ama shey cayiman.

Baaritaanka meel cayiman waxaa laga yaabaa in meeshaasi gudaheeda laga soo helo ruuxa la xeraayo ama laga helo qof si sharci darro ah lagu soo xiray.

b. Marka ay laga maar maan tahay baaridda qof cayiman goob ama shey cayiman waxaa loola jeedaa helitaanka qalab cadeymeed oo muujin kara dembiga.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Amarka xayiraadda maxkamadda waxaa lasoo saari karaa marka ay jiraan sababo aasaasi ah oo la rumeysan karo in sheyga dembiga lagu galay la heli karo lana soo qaban karo.
3. Shey kasta oo dembiga dhicitaankiisa qeyb ka ah oo la helo xilliga baaritaanka waxaa toos loogu qabanayaa amarka baaritaanka marka qofka gacanta ku haaya ama maamula sheyga la qabanaayo uu diido inuu bixiyo, amarka xayiraadda waxaa wehlinaaya awood u lahaanshaha baarita ilaa xadka ay tahay in la fuliyo amarka baarista.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

## FULINTA AMARKA BAARITA IYO XAYIRAADDA

amarka baaritaanka iyo xayiraadda laguma fulin karo guryaha gaarka loo degan yahay saacadaha u dhaxeeya 6 pm ilaa 7am, hadii aanay jirin baahi lama huraan ah oo loo fuliyo ama maamulka soo saaray aanu amrin in saacad kasta la fulin karo amarkiisa, labada nuqul ee amarka waxaa mid ka mid ah la siinayaa qofka la baaraayo ama qofka mas'uulka ka ah goobta la baaraayo ama sheyga la baaraayo ee la amray in la xayiro.

## WAXAA JIRO XEERAR KALE EE LA DHAWRAAYO MARKA LAGU JIRO XAALADDA FATASHAADDA AMA XAYIRAADDA, WAXAANA KA MID AH:

1. Qofka fulinaayo baaritaanka ama xayiraadda waxa uu isticmaali karaa xoogga caqli galka ah si uu u fuliyo baaritaanka ama xayiraadda hadii ay timaado iska caabin ama diidmo lagala hor yimaado fulinta baaritaanka ama xayiraadda, waxaa kaloo la baarayaa qof kasta oo xaadir ku ah meesha la barayo hadii ay jiraan asbaabo lagu rumeysan karo inuu ruuxaasi qarinaayo sheygii lagu galay dembiga.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Qof kasta oo la barayo ama qof kasta oo mas'uul ka ah goobta la baarayo qalabka baaritaanka ku socdo ama la xayiraayo waxaa waajib uu ka saaran yahay inuu bixiyo tashiilaad maan galka ah ee fulinta baarista iyo xayiraadda.
3. Marka la baarayo qof waa in anshaxa dhaqameed si buuxda loo dhawraa, hadii qofka la baarayo uu yahay qof dumar ah waxaa baarista sameyn kara ruux kale oo dumar ah oo kaliya.
4. Hadii goobta la baarayo ama sheyga la baarayo ay mas'uul ka tahay haweeney, haweeneydana aanay marka loo eego dhaqanka usoo baxaynin dibadda waxaa la siinayaa fursad kasta oo macquul ah oo ay isugu asturto goob ku haboon oo ay isku qarin karto.
5. Lama qaban karo wax qoraal ah ama dukuminti ah oo yaala gudaha goobta qareenka ama la taliye farsamo kuwaasi oo la xiriira gudashada mihnadooda, hadii aanay waraaqahaasi ama dukumintigaasi aanay ahayn qalabkii ama mirihii dembiga ka dhashay

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **BAARITAANKA IYO XAYIRAADDA AMAR MAXKAMADEED LA'AANTII.**

1. Sarkaalka booliska ah ee ka mas'uulka ah baaritaanka si waafaqsan Qod. 24 XHCS waxa uu sameyn karaa baritaan ama xayiraad isaga oo aan wadan amar maxkamadeed hadii ay jirto baahi deg deg ah, ama marka ay jiraan sababo la rumeysan karo in waqtiga lagu heli karo amarka maxkamadeed ee baaritaanka ama xayiraadda laga yaabo in qalabka marag muujinta ah ay suurtowdo in la baab'iyo ama la tirtiro si aan loo helin raadkii fal dembiyeedka ama ay dhici karto qofka la baadi goobayey uu ku fakanaayo.
2. Sarkaalka booliska ah ee fulinaayo baaritaanka ama xayiraadda ee aanan wadanin amar maxkamadeed waxa uu sida ugu dhaqsiyaha badan ugu war gelinayaa garsooraha awoodda u leh qaadista dacwadaasi ama garsooraha maxkamadda ugu dhaw meesha uu baaritaanku ama xayiraaddu ka dhaceyso, waxaa kaloo lagu war gelinayaa xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka isagoo u cadeynaaya sababaha ay lagama maarmaan u noqotay inuu fuliyo baaritaan iyo xayiraad isagoo aan haysanin amar maxkamadeed ama natiijada kasoo baxday baritaanka ama xayiraadda caynkaasi ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

3. Hadii baaritaanka ama xayiraadda ee uu sameeyey sarkaalka booliska ah isagoo aanan wadanin amar maxkamadeed aan lala socodsiinin garsoore muddo sideed maalmood gudahooda ah baaritaankaasi ama xayiraadaasi waxaa loo qaadanayaa mid lagu fuliyey si sharci darro ah waxayna noqoneysaa mid aan lahayn qiimo sharci ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

## DAMIIN (QOD. 59 XHCS)

1. Kusii deynta damiinku waa:-
   a. Ka joojinta qofka xiran ama eedeysanaha ah amar qabasho maxkamadeed iyadoo loo tixraacayo Qod. 60/2/a XHCS.
   b. Sii deynta qofka sifo sharci ah loo xiray.
2. Sii deynta damaanadeed waxaa lagu waajibin karaa:-

Fulinta hanti dabar looga dhigay ruuxa eedeysanaha ah ama dad kale ama labada qof oo kala ah eedeysanaha ama dadka kale wadajir ahaan muhiimad gaar ah aawgeed si loo hubiyo in eedeysanuhu hor imaanayo maxkamadda awoodda u leh dacwadiisa iyo shuruud kasta oo kale oo ay maxkamdu u aragto iney ku filan tahay kusii deynta damiinka.

3. Marka laga reebo xaaladaha xeerkani suu si kale u nidaamiyey damiinka lama bixinaayo xaaladaha uu yahay amarka qabashada maxkamadda mid qasab ah.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **BIXINTA DAMIINKA:**

Damiinka waxaa bixin kara oo kaliya garsooraha la hor keenay ruuxa xiran ama garsoore awood u leh xilliga dhageysiga dacwadda ka bilaabanaayo maxkamadda darajada koobaad ama gudoomiyaha maxkamadda awoodda u leh dhageysiga dacwadda marxalad kasta oo kale.

Xaaladaha damiinka la ogolaaday waxaa lagu dabri karaa dhawrista amarka lagu ogolaanaayo damiinka oo uu wehliyo amarka qabashada ama marxalad kasta oo hartay dhageysiga dacwadda si waafaqsan timaamaha ku xusa Qod. 59/2 XHCS.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

## NOOCA IYO XADIGA DAMAANADDA:

1. Damaanaddu waxa ay ka koobnaaneysaa qadar lacageed oo damiintuhu si waafaqsan tilmaamaha shuruudaha maxkamaddu ku bixisay damiinka uu dhigaayo maxkamadda ama damaanad qaadayo in uu bixiyo marka la jebiyo shuruud ka mid ah kuwa damaanadda.
2. Waajibinta damiinka maxkamadda waxa ay tixgelineysaa tirada iyo awoodda dhaqaale ee damiinteyaasha iyo qadarka damaanadda la dhigaayo maxkamadda ama la bixinaayo marka la jebiyo shuruudaha damaanadda.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- Qadarka dbarka damaanadda waxaa lagu sargoynayaa duruufaha ku xeeran ee ku haboon xaaladda dhinacyada ay quseyso mana noqon karto mid xad dhaaf ah.
- Sii deynta buuxinta shuruudaha damaanadda:

A. Qofka waxaa lagu sii deyn karaa oo kali ah damiin marka uu kasoo baxaya shuruudaha la saaray ee la xiriira oofinta damaanadda.

B. Marka uu amarka qabashadu xambaarsan yahay ogolaashaha damiinka qofka fulinaayo amaka maxkamadda waxa uu ka joogsanayaa xerista eedeysanaha ama wuu sii deynayaa isagoo aan horgeynin maxkamadda sid waafaqsan Qod. 45 XHCS, marka shuruudaha dabarka damaanadda lagu oofiyo waqtigii loo xadiday

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

**KA NOQOSHADA DAMIINKA:**

1. Maxkamadda awooda u leh bixinta damiinka si waafaqsan tilmaamaha Qod. 60/1 XHCS way ka noqon kartaa damiin waxayna soo saari kartaa amarka qabashada eedeysanaha hadii:

A. Eedeysanaha uu jebiyo mid ka mid ah shuruudihii la saaray.

B. Hadii ay jiraan arimo asaasi ah oo la rumeysan karo inuu eedeysanuhu ka tagaayo ama uu ka tagi rabo geyga qaranka.

C. Qadarka dabarka ee damaanadda aanu ku filneyn ama ay jirto sabab qiyaano ku jirto ama uu jiro qalad sabab la nooc ah.

D. Mid ka mid ah damiinteyaasha hadii uu la yimaado sabab maangal ah darteed uu dalbado in laga xureeyo damiinka ama uu dhinto.

E. Inuu damiintuhu uu dalka ka tagay ama ay jirto sabab la rumeysan karo inuu dalka ka tagaayo.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

2. Hadii damaanadda laga noqdo sababo kasta oo ka mid ah kuwa ku cad qoraalka sare ku xusan, waxaa bannaan oo la siin karaa eedeysanaha mar kale damaanad hadii la xaqiijiyo iney meesha ka baxdau asbaabtee loogala noqday damaanadda.
3. Damiintaha codsaday in laga xoreeyo damiinka waxaa kaliya oo uu xuroobi karaa kadib marka eedeysanaha la xero.

# XEERKA HABKA CIQAABTA SOOMAALIYEED

- **BIXINTA LACAGTA DAMAANADDA**

1. Haddii wax ka mid ah shuruudihii damaanadda la jebiyo maxkmadda damaanadda bixisay si waafaqsan 60/1 XHCS waxa ay amri kartaa in la bixiyo qadarka cuuraar ahaan loo dhigay maxkamadda ama la ballan qaaday dhammaanteed ama qeyb ka mid ah.
2. Haddii damiintuhu ku guul dareysto sabab la’aan bixinta qadarka lacageed ee maxkamaddu amartay waqtiga la siiyey gudihiisa si waafaqsan Qod. 64/1 XHCS waxaa lagu oogi karaa damiintuhu dacwad in uu lacagta mag dhawo oo lagu dabaqaayo habraaca fulinta xukunnada madaniga ah.